

Xarunta Farshaxanka Bulshada ee Footscray

Xarunta Farshaxanka Bulshada ee Footscray (Footscray Arts) waxay la shaqaysaa bulshoyinka iyo farshaxan-yaqaannada si loo soo saaro nashaadyada farshaxanka ee bulshadu leedahay. Waxaana ka mid ah:

- samaynta mashaariicda farshaxanka
- soo-bandhigidda barnaamijyada, wookshoobyada, iyo munaasabada
- taageeridda horumarinta nashaadyada farshaxanka ee bulshadu leedahay oo ay wadaan shakhsiyaadka, kooxaha iyo hay'adaha
- kiraysiga boosaska iyo meelaha lagu qabanayo wookshoobyada, shirarka, damaashaadyada iyo munaasabada

Xarunta Footscray Arts waxay ku taallaa inta u dhaxaysa Henderson House iyo bakhaarka ku yaalla janbiga Webiga Maribyrnong. Webigaan wuxuu dhexmaraa western region of Melbourne, Australia. Waxaan garowsannahay inaan degganahay dhulkii hore ee qabiilkii Wurundjeri tribe of the Kulin Nation. Waxaan ixtiraamkayaga u haynaa waxgaradkii iska lahaa dhulalka hore, iyo anagoo ayaga qadarintayada u sii marinayna dadka Aboriginal iyo Torres Strait Islander.

Xarunta Footscray Arts waxay dhisnayd ilaa 1974kii. Hay'addaan waxay ku heshay aqoonsi caan ah oo heer qaran ah horseedidda taageeradeeda farshaxanka bulshada iyo horumarinta farshaxannada dhaqannada-badan ee Australia. Waxaan u riyaqnaa firfircoonida ka dhaxaysa *farshaxanka* iyo *bulshada*, arrintaasna waxaan ka baranay, ka dibna hirgaleyn hababka cusub ee wax allifidda, fikirka, adeegsiga iyo iskaashiga.

Maxaan samaynaa

Shaqadayadu waxay ka kooban tahay qaybaha soo socda:

- **mashruucyo.** Waxaan soo saarnaa mashruucyada farshaxannada ee bulshadu leedahay kaas oo taxaddiya farshaxanka beesha. Mashruucyadayadu waxay la shaqeeyaan shakhsiyaadka, bulshooyinka, farshaxanno iyo hay'ado aad u ballaaran.
- **barnaamijyo.** Barnaamijyadayada waxaa ka mid ah: barnaamijka wookshoobka oo loogu talagalay dadka da'aha kala duwan ku jira. Barnaamijka deganaanshaha farshaxanka, ArtLife (waa barnaamij loogu talo-galay dadka ay hayaan iimuhu si ay uga qaybgalaan nashaadyada farshaxannada ayna u yeeshaan xirfado nololeed), iyo Incubators (waa barnaamij taageera horumarka kooxaha kala duwan ee ku xidhan Xarunta Footscray Arts)
- **munaasabado.** Barnaamijka munaasabadaheenu waxaa ka mid ah waxqabadyada, fadhida, muujinta farshaxanka socda, khudbadaha farshaxan-yaqaanka, iyo bandhigyada.

Nala soo xidhiidh

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah, fadlan nagala soo xidhiidh:

Footscray Community Arts Centre
45 Moreland Street
Footscray
Victoria, Australia 3011

+61 3 9362 8888 (taleefoonka)
+61 3 9362 8866 (fax)

reception@footscrayarts.com

www.footscrayarts.com

Waxaan kuu diyaarin karnaa turjumaanka taleefoonka oo lacag la'aan ah haddii aad u baahan tahay adeeggaas